



Ka hor Intaan la Yeerin Gambaleelka Dugsiga

Wakaaladaha ka dhisan Waterloo Region ee taageerada siiya carruurta yaryar ee leh baahiyaha adag waxay si wadajir ah ula shaqeeyaan guddiyada dugsiga si ay uga caawiyaan carruurta iyo qoysaska inay u gudbaan dugsiga. Si loo hubiyo in dhammaan qoysaska ay haystaan macluumaadka ay u baahan yihiin, waxaa jiro hal habraac, oo qof kastaa uu isticmaalo. Waxaa jira qof hormuud u noqonaayo caawinta qoyska qofkaasna waxaa loo yaqanaa the Referral Source.

Haddii canugu uu dhigto xanaanada ilmaha ee shatiga leh, Resource Consultant ayaa noqon doona the Referral Source. Haddii canuga uusan ku jirin xanaanada ilmaha, Referral Source waxa laga yaabaa inay noqoto Family Infant Child Consultant, xubin ka tirsan shaqaalaha Ontario Autism Program, ama daaweeyaha KidsAbility.

Tani waa liiska saddexda shay ee waaweyn ee ka dhaca hannaanka kala guurka:

1. The Referral Source ayaa ku waydiin doona inaad saxiixdo foomka oggolaanshaha wadaagista macluumaadka oo elektarooniga ah kaas oo si ammaan oo eletroonig ah loogu wadaagi doono gudaha guddiga dugsiga ilmahaagu dhigin doono. Tani waxay dhici kartaa sida ugu dhaqsaha badan horaanta bisha Nofeembar sanadka ka horeeya gelitaanka dugsiga.
2. School Board Consultant ayaa soo ururin doona macluumaadka ku saabsan ilmahaaga si uu warbixin uga helo oo uu ula hadlo wakaaladaha aad oggolaanshaha siisay.
3. Haddii loo baahdo, shirka Transition to School ayaa laga yaabaa in la qabto si loo wadaago macluumaadka iyo qorshaha bilawga fudud ee Sebteembar. Shirarka kala-guurka waxay inta badan dhacaan Gu'ga iyo mararka qaarkoodna Horaanta Dayrta, waxayna ku dhici karaan khadka taleefoonka, shir maqal muuqaal ahaan, ama si fool-ka-fool ah.

Qorshaynta Gelitaanka Dugsiga

Foomka Oggolaanshaha Macluumaadka – The Referral Source waxay waalidka/mas'uulka sharciga ah ka codsan doonaan oggolaanshaha inay la wadaagan macluumaadka aasaasiga ah guddiga dugsiga iyada oo loo marayo madal ammaan, oo elegtaroonig ah, iyo sidoo kale macluumaadka afka ah ee lagu bixiyo khadka taleefoonka iyo warbixino qoraal ah oo u dhexeeya wakaaladaha bulshada ee ku lugta

leh ilmahaaga. Macluumaadka waxaa ka mid ah: magaca ilmahaaga, cinwaanka, dugsiga bulshadaada, adeegyada uu ilmahaagu helo iyo cidda foomka loo diri karo. Iyadoo la haysto fasaxaaga, warbixinta qiimaynta ilmahaaga, qorshaha taageeradooda, meelaha ay ku wanaagsan yihiin, iyo baahiyahooda ayaa la wadaagi doonaa. Foomka oggolaanshaha wadaagista macluumaadka waxa lala wadaagayaa guddiga dugsiga ee ilmahaagu ka diiwaangashan yahay. Fadlan xasuusnow: Foomamka loo sii daayo guddiga dugsiga waxa lala wadaagi karaa shaqaalaha dugsiga, shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ama xubnaha kale ee shaqaalaha dugsiga ee ku habboon. Waxaa laga yaabaa in ay kula soo xiriiraan shaqaalaha kale ee dugsiga si ay kaaga helaan wixii macluumaad dheeraad ah iyo oggolaanshaha haddii loo arko in loo baahan yahay.

Adeegyada Daaweynta ee ku jira Nidaamka Dugsiga – Kuwa adeegyada ka hela KidsAbility, shaqaalaha daawaynta waxay dib ula eegaan waalidka/mas'uulka, hannaanka gudbinta iyo sida daawadu uga duwanaa doonto sida hadda loo bixiyo.

Uruurinta Macluumaadka– School Board Consultants waxa laga yaabaa inay macluumaad ka soo ururiyaan ilo kala duwan oo ay ku jiraan warbixinnada iyo ilaha gudbinada. Waxay qayb ka yihiin qoys dugsiyo ah waxaana laga yaabaa inay kugula hadlaan munaasabadaha hanuuninta xanaanada. Xaaladaha qaarkood, School Board Consultant waxa laga yaabaa inuu u kuurgalo ilmahaaga ku jiro barnaamijkooda haddii tafatiro loo baahan yahay si ilmahaagu u dhigto dugsigooda bulshada. School Board Consultants ayaa markaa kadib la hadli doona maamulaha dugsiga uu ilmahaagu dhigan doono si ay ula wadaagaan macluumaadka khuseeya.

Diiwaangelinta – Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa ubadkooda ka diiwaangaliya xanaanada ilmaha. Si aad u hesho macluumaadka diiwaangelinta, wac dugsiga bulshadaada, booqo mareegta Waterloo Region District School Board) www.wrdsb.ca ama mareegta Waterloo Catholic District School Boarda www.wcdsb.ca (si aad u meelaysato dugsiga bulshadaada waxaad sidoo kale [qujin kartaa halkan](#)).

Waxaad u baahan tahay inaad qaadato shahaadada dhalashada ilmahaaga, diiwaanka tallaalka ama warqadda ka dhaafitaanka ee ay samayso Waterloo Region Health Department, caddaynta cinwaanka iyo Catholic Baptismal Certificate ee khuseeya ee WCDSB.

Wixii ah waalidiinta ay carruurtoodu dhigan doonaan KidsAbility School iyo dugsiga bulshadooda labadaba, waa lagama maarmaan ah in waalidka/mas'uulka ay la xiriiraan barnaamij kasta oo ay ku wargeliyaan in ilmahoodu ka qaybgeli doono labada barnaamijba.

Kulamada u Guurista Dugsiga – Waalidiinta/masuuliyiinta waxa laga yaabaa in lagala

xiriirto wax ku saabsan qorshaynta kulanka Transition to School. Kulamada waxaa lagu qaban karaa khadka taleefoonka ama shir maqal muuqaal ah, ama si fool-ka-fool ah. Kuwaas waxaa soo qabanqaabiyay Meeting Coordinator kaas oo ah Referral Source. *Ka-reebitaanka: School Personnel ayaa noqon doona Meeting Coordinator marka KidsAbility uu yahay Referral Source.* Haddii kulan la qabto, macluumaadka ku saabsan waxa ilmahaagu ku wanaagsan yihiin iyo baahiyahooda waxa lala wadaagayaa kooxda dugsiga. (Eeeg Tips for Parents)

Carruurta qaarkood, waxaa laga yaabaa inay go'aamiyaan School Consultant, Referral Source, iyo waalidka/masuulka in kulanka Transition to School aanan loo baahnayn. Waxaad si wadajir ah u go'aansan doontaan macluumaadka loo baahan yahay in lala wadaago dugsiga iyo sida loola wadaago.

Marka loo baahdo, kulamada Transition to School ayaa dhacaya, iyadoo ay ku lug leeyihiin waalidka/masuuliyiinta, shaqaalaha dugsiga, shaqaalaha guddiga dugsiga, iyo bixiyayaasha bulshada ee hadda. *Fadlan Xasuusnow: Daaweeyayaasha KidsAbility ayaa caadi ahaan uga qaybgalin kulamadaan.*

Waalidiinta/masuuliyiinta ayaa laga yaabaa inay wax ka weydiiyaan qabanqaabada booqashada dugsiga.

Macluumaadka Kulanka U Gudbinta Dugsiga

Goormee ayuu kulankaan dhici doonaa?

- Haddii loo baahdo, Kulanka Transition to School waxa laga yaabaa inuu dhaco gu'ga ama dayrta ka hor inta aanu ilmahaagu bilaabin dugsiga Sebteembar.
- Xaaladaha qaarkood, haddii Referral Source Ilmahaagu yahay Resource Consultant, xubin ka tirsan shaqaalaha Autism Program, ama Family Infant Child Consultant, waxay qabanqaabin doonaan taariikh iyo wakhti ay waalidka/masuulka iyo shaqaalaha dugsigu iman karaan.
- Kulanku waxa uu socon doonaa ku dhawaad 45-60 daqiiqo.

Waa maxay ujeedada kulankan?

- Dugsigaagu wuxuu rabaa inuu ku soo dhaweeyo wuxuuna rajeynayaa inuu kuu xaqiijiyo in ilmahaaga si wanaagsan looga taageeri doono gudaha goobta dugsiga.
- Qof kasta oo ka soo qaybgala kulanka ayaa kula wadaagi doona macluumaad ku saabsan ilmahaaga awoodiisa, baahidiisa iyo waxa uu xiiseeyo.
- Qorshaynta wada shaqaynta ayaa bilaabmi doonta taasoo tilmaami doonta siyaabaha lagu caawinayo ilmahaagu inuu si habsami leh oo guul leh u bilaabo dugsiga.

Yaa tahay cidda ka soo qaybgalaysa kulankaan?

- Waxaad ka soo qaybgali doontaa kulanka. (Fadlan dib ula eeg Meeting Coordinator-kaaga oo aad ku martiqaadi karto kulanka).
- Bixiyaha dareyeelka canugaaga, Resource Consultant, Family Infant Child Consultant,

ama xubin ka tirsan shaqaalaha Autism Program, iyo shaqaalaha School Board oo ilmahaaga ku taageeri doona xilliga dugsiga xanaanada ayaa laga yaabaa inay soo xaadiraan.

Fadlan Xasuusnow: KidsAbility Physiotherapists, Occupational Therapists, Speech-Language Pathologists, iyo Social Workers, ma qabanqaabinayaan ama ma ka soo qaybgalayaan kulamadaan, haddii ay jiraan xaalado adag, oo gaar ah mooyee.

- Waxaad kulanka keeni kartaa qof ku taageeri kara sida xubin qoyska ka tirsan ama saaxiib.

- Ilmahaaga ha keenin kulanka. Waxaad codsan kartaa fursad kale oo uu ilmahaagu kula kulmo dadka ka socda dugsigaaga.

- Maaddaama macallimiinta aan inta badan lagu qorin fasallada ay bari doonaan illaa xiliyaha dambe ee sannadka, macallinka xanaanada ilmahaaga waxaa laga yaabaa in uusan joogin kulankaan. Dadka kale ee ka socda dugsiga ayaa halkaas joogi doona waxayna heli doonaan fursad ay kula wadaagaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga macallimiintooda wakhti dambe.

Sidee ayaad isugu diyaarin kartaa kulanka?

- La hadal dadka hadda la shaqeeya ilmahaaga. Way ku caawin karaan! Waxaad heli doontaa fursad aad qof walba uga sheegto wax ku saabsan ilmahaaga inta kulanku socdo. Ma noqon doonto waqti dheer sababtoo ah qof kastaa wuxuu u baahan yahay fursad uu ku hadlo, laakiin waxay noqon doontaa qaybta kulanka ugu muhiimsan.

- Waxaad kulanka u qaadan kartaa wax kaa caawin doona inaad ilmahaaga barto qof kasta. Tusaale ahaan, waxaad qof walba tusi kartaa sawir ama xirmo ay ku jiraan 'All About Me'

- Qorshayso qodobada muhiimka ah ee aad rabto in dugsigu maqlo oo qor si aad u qaadato oo aadan u iloobin inaad waydiiso.

- Haddii uu kula socdo qof sida xubin qoyskaaga ka tirsan ama saaxiib, waxaad ka codsan kartaa qofkaas inuu wax ka qoro inta shirka lagu jiro asagoo matalaaya magacaaga.

Maxaa dhici doona inta uu shirku socdo?

- Meeting Coordinator ama School Principal ayaa sida caadiga ah haga kulanka oo hubiya in daqiiqadaha la qoro ka dibna qof walba loo diro wixii inta ka dambeeyo.

- Qof kasta oo yaqaan ilmahaaga, oo adiga aad ku jirto, waxay yeelan doonaan soo jeed gaaban si ay uga hadlaan ilmahaaga.

- Dadka dugsiga ka socda ayaa dhageysan doona oo way weydiin doona su'aalo si ay u bilaabaan inay fahmaan ilmahaaga. Ugala hadal baahiyaha ilmahaaga sida daacadda ee suurtoogalka ah sababtoo ah tani waxay dugsiga ka caawin doontaa inuu si wanaagsan ugu diyaargarobo inuu taageero siiyo ilmahaaga.

- Waxaa jiri doona qaar ka mid ah tallaabooyinka xiga ee loo qorsheeyay kulankan,

laakiin faahfaahino badan iyo qorshayaasha ugu dambeeya ayaa loo badinayaa inaan lagu go'aamin doonin kulankaan.

- Waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad saxiixdo foomamka qaarkood, sida foomamka gudbinta iyo foomamka oggolaanshaha.
- Weydii su'aalo oo sii naftaada wakhti aad ku fikirto haddii aadan hubin wax fikrado, codsiyo, ama qorshayaal ah.
- Waydii cidda aad la xiriiri karto haddii aad wax su'aalo ah qabtid dhawrka bilood ee soo socda.

Waa maxay waxaan ku darayo buug-yaraha 'All About Me'?

Macluumaadka waxaa ka mid noqon kara:

- Sawirka canugaaga
- Macluumaad qoyska, walaalaha, xayawaanka rabaayada ah
- Erayada ka socda ra'yiga canuga
- Erayada ay dadku igu sifeeyaan (tusaale. Faraxsan, qosol badan, badrooni, niyadda degan)
- Waxyaabaha aan runtii ku fiicanahay (tusaale, waxyaabaha aan jeclahay, danaha gaarka ah)
- Caqabadahayga (tusaale, waxyaalaha iga walwalsiiya ama iga caraysiiya)
- Xeeladaha shaqeeya (tusaale, sawirada igaga digaya kala guurka, ereyada muhiimka ah ee iga caawiya inaan isdejiyo)
- Waxyaabaha aad runtii u baahan tahay inaad ogaato (tusaale, xasaasiyadaha, walaacyada cunto, daawooyin)
- Waxa adiga iyo ilmahaagu aad rajaynaysaan sanadkan

Goormee ayaan booqan karaa dugsiga?

- La xiriir Principal ama Secretary dugsiga

si aad wax uga waydiiso booqashada bisha Juun ama inta lagu jiro toddobaadka ugu dambeeya

ee Ogosto.

- Maalmaha fasaxa ama saacadaha dugsiga kadib, canugaaga la booqo garoonka ciyaarta ee dugsiga oo kala hadal waxa uu ka filayo dugsiga cusub.

Soo-gaabinta & Qeexitaannada

Magaca	Soo-gaabinta	Qeexitaanka
Home and Community Care Support Services- Waterloo Wellington (Adeegyada Taageerada Daryeelka Guriga iyo Bulshada- Waterloo Wellington)	HCCSS	Xirfadlayaashani waxay bixiyaan qiimayn iyo la tashi ku saabsan baahiyahaaga caafimaadka iyo daawaynta
Home and Community Care Support Services - School Health Support Services (Adeegyada Taageerada Daryeelka Guriga iyo Bulshada - Adeegyada Taageerada Caafimaadka Dugsiga)	HCCSS-SHSS	Home and Community Care Support Services - School Health Support Services (Adeegyada Taageerada Daryeelka Guriga iyo Bulshada - Adeegyada Taageerada Caafimaadka Dugsiga)
Full-Day Kindergarten(Dugsiga Xannaanada Maalinta-Buuxda)	FDK	Waa maalin udub dhexaad u ah ilmaha, korriin ahaan ku haboon, isku dhafan, maalin waxbarasho oo la dheereeyey oo loogu talagalay carruurta da'doodu tahay afar- iyo shan sano jir.
Individual Educational Plan (Qorshaha Waxbarashada Khaaska ah)	IEP	IEP qoraal ah waxaa soo saaray macalimiinta iyo waalidiinta si ay ilamaha uga caawiyaan inay dugsiga ku guuleystaan.
Identification, Placement and Review Committee (Guddiga Aqoonsiga, Meelaynta iyo Dib-u-eegista)	IPRC	Guddigan ayaa go'aaminaya in haddii canuga loo aqoonsan doono inuu yahay mid gaar ah xagga Isgaarsiinta,

		Garashada, Jirka, Habdhaqanka, Meelo badan iyo meeleynta ugu wanaagsan.
Ontario Education Number (Lambarka Waxbarashada Ontario)	OEN	Kani waa lambarka aqoonsiga ubadkaaga kaas oo ay u qoondaysay Ministry of Education wuxuuna la soconaya ilmahaaga ilaa u ka dhameeyo dugsiga hoose ilaa iyo kan sare.
Ontario Student Record (Diiwaanka Ardayga ee Ontario)	OSR	OSR waa diiwaan qarsoodi ah oo ku saabsan horumarka waxbarashada ilmahaaga dhammaan sannadaha dugsigooda. Waalidiinta, maamulayaasha iyo macallimiinta ayaa galaangal u heli karaan OSR.
Special Education Advisory Committee (Guddiga La-talinta Waxbarashada Khaaska ah)	SEAC	Guddigani wuxuu wakiillada iyo maamulka guddiga dugsiga kala taliyaa wax ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah.
Special Education Resource Teacher (Macallinka Taageerada Waxbarashada Gaarka ah)	SERT	Macallinkani waxa uu leeyahay u-qalmitaano dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah wuxuuna macallinka fasalka kala shaqeeyaa sidii uu u dabooli lahaa baahiyaha ilmahaaga.
Special Equipment Amount (Qadarka Qalabka Khaaska ah)	SEA	Maalgelinta SEA waxaa loo qoondeeyay in lagu soo iibiyo qalabka uu ku taliyay xirfadlaha aqoonta sare u leh, marka qalabku uu muhiim u yahay guusha ardayga dugsiga dhigta.

Transition to School (U Gudbidda Dugsiga)	TTS	Tani waa hannaanka wadaagista macluumaadka iyo u diyaargarowga si looga caawiyo canug kasta inuu si guul leh u galo dugsigooda cusub.
Waterloo Catholic District School Board (Guddiga Dugsi Degmeedka Katooliga ee Waterloo)	WCDSB	WCDSB waxaa ka go'an in ay bixiso barnaamijyo iyo adeegyo si ay u buuxiso kala duwanaanshaha baahiyaha ardayda ee ka jirta gudaha Catholic Schools.
Waterloo Region District School Board (Guddiga Dugsi Deegaameedka Katooliga ee Waterloo)	WRDSB	Barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee WRDSB wuxuu ku salaysan yahay falsafada ah in arday kastaa uu xaq u leeyahay inuu helo deegaanka leh waxbarashada ugu faa'iidada badan ee la heli karo.

Xasuusino:

Si wadajir ah uga shaqaynta si loo taageero inuu ilmahaaga u gudbo dugsiga!